QEYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Hagitaanka Su'aalaha badanaa La Isweydiiyo (FAQs) – Isu-imaatinada

(La Cusboonaysiiyey 1-11-2021)

Hoos waxaa ku yaala jawaabaha FAQ-yada ee ku saabsan Hagista Waaxda ee Isku-imaatinada ee Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA). OHA waxay bixisaa FAQ-yadaan si ay uga caawiso bulshada inay fahamto hagida, si ay uga jawaabaan su'aalaha daneeyeyaasha, iyo si ay u xaqiijiyaan sida hagida u khuseyn karto dhacdooyinka gaarka ah. Su'aalahaan Aalaaba La Isweydiiyo (FAQs) waxaa la cusbooneysiin karaa muddo kadib. FAQ-yada looguma talogelin inay buuxiyaan booska hagista, laakiin waxaa loogu talagalay inay fasiraan, kaabaan, oo ka bixiyaan faahfaahino hagista.

S1: Miyey xadadka isku-imaatinada guriga iyo bulshada ee kusalaysan heerka halista ee degmadu, ma u oggolanayaan isku-imaatinada gudaha iyo dibadda isla markaas?

J1: Haa, laakiin haddii ay jiraan isku-imaatino gudaha iyo dibadda ah oo ka socda guriga ama bulshada oo isla mar dhacaya, cidda isku-imaatinadan martigalinaysaa waa inay hubiso inayna tirada dadku ka badnaan tirada la oggol yahay isku-imaatinka gudaha guriga ama bulshada ee heerka halista degmada halkaasi oo isku-imaatinku ka socdo.

S2: Waa maxay xaddidaada isu-imaatinka tacsida?

J2: Tacsida ka dhacaysa guri gaar loo leeyahay waxa loo baahan yahay in la raaco xadadka isku-imaatinka ee isku-imaatinada bulshada iyo guriga iyadoo lagu salaynayo heerka halistaee degmada ay tacsidu ka dhacayso. Tacsida ka dhacaysa guriga tacsida, qolka maydka ama xabaalaha waxa loo baahan yahay in la raaco xadadka qaadka ugu badan ee xarumaha diimaha, guryaha tacsida, qolalka maydka iyo xabaalaha iyadoo lagu salaynayo heerka halista ee degmada ay tacsidu ka dhacayso.

S3: Ma inay dugsiyada K-12 raacaan baa Hagista Isku-imaatinada Gobolka oo Dhan ee OHA?

J3: Maya.Dugsiyada waxaa waajib ah inay raacaan Hagista Waaxda Waxbarashada Oregon ee Dugsiyada Diyaarka ah, Ardayda ammaanka ah ee loogu talagalay Sannad Dugsiyeedka 2020-21.

S4: Miyay xarumaha diimeed, sida kaniisadaha, tahay inay raacaan xaddidaadyo ugu badan ee gaarka ah?

J4: Hay'adaha caqiidadu waxa si xoog leh lagula talinayaa inay raacaan xaddidista qaadka ugu badan ee heerka khatarta ee la qoondeeyay ee gobolka hay'addu ku taalo

S5: Waa maxay xaddidaadaha iyo hagista xajmiga qaarka ee ugu badan ay tahay in kulamada soo-kabashada shirarka (tus., Alcoholics Anonymous) ee ka dhex dhaca gudaha xarumaha diimeed ay raacayaan?

J5: Kulanada Soo kabashada ee ka dhex dhaca gudaha hay'adaha diimeedka waxa laga rabaa inay raacaan shuruudaha kulanada bulsho ee ku qoran Hagaha Guud ee Shaqaalaysiiyayaasha iyo Ururada. Xaddidaadaha qaarka iyo heerarka halista ee degmooyinka, fadlan ka tixraac Shaxda Hagista Heerka Halista Waaxda.

Kulamada soo-kabashada waxaa waajib ah inay raacaan Hagista Xayiraada Gobolka oo Dhan ee Maaskarada Waji Daboolka, Gaashaanka Wajiga waana inay hubiyaan in lix (6) fuudh ay u dhexeyso kaqeybgaleyaasha iyo shaqaalaha.

S6: Waa maxay hagista ururrada caqiidada ay raacayaan si ay u xaddidaan isu-imaatinka? Miyaa loo arkaa kulan ka dhaca Elks Lodge inuu yahay isu-imaatin bulsheed?

J6: Kulanka ka dhici kara Elks Lodge waxa loo tixgaliyaa isku-imaatin bulsho waxaana waajib ah in la raaco xaddidaadaha isku-imaatinka bulshada ee heerka halista ee degmada halka uu ururka dadka mabda' wadaagta ah ay kulanka ku qabsanayaan.

Haddii urur dadka mabda'da wadaagta ah uu ka shaqeeyo adeegyada cuntada iyo cabbitaanka, waa inuu sidoo kale raacaa Hagista Meheradaha Cuntada iyo Cabbitaanada.

S7: Miyay ganacsiyada, sida dhismaha ama nadiifinta guryaha, geli karaan guryaha? Haddii ay sidaasi tahay, miyay qayb ka noqonayaan isu-imaatin ka dhex dhaca guriga?

J7: Ganacsiyada u baahan inay galaan guri si ay u dhammeystiraan dayactiro, nadiifin ama adeegyo kale sidaasi way sameyn karaan. Shaqaalaha ganacsiyada gala guryaha qayb kama ahan isu-imaatinka ka dhex dhaca guriga. Ganacsidaan waa inay raacaan Hagista Guud ee Loo-shaqeeyayaasha iyo Ururada, hagista Gobolka oo Dhan ee Maaskarada, Waji Daboolka, Gaashaanka Wajiga iyo hagis kasta oo kale oo OHA bixiso.

S8: Haddii aan u isticmaalo goob xarun diimeed wax aan ka ahayn isu-imaatin diimeed, tusaale ahaan barashada muusiga, miyey tahay inaan raaco Hagista Xarumaha Diimaha?

A8: Maya. Hawlaha ka dhex dhaca hay'ad diimeed, ee aan ahayn adeeg caqiideed, waa inay raacaan tilmaamaha qaybeedka loogu talo galay hawshaas. Tusaale ahaan, ciyaaraha heesuhu waa inay raacaan Tilmaamaha Madadaalo

Gudeedka ee loogu talo galay heer khatareedka gobolka hay'ad caqiideedku ku taal.

S10: Haddii qoyskayagu ka kooban yahay tirada dadka ee la oggol yahay iyadoo lagu salaynayo heerka halista ee halka isku-imaatinka lagu qabanayo, miyuu qoyskayaga oo dhami la kulmi karaa qoys kale?

J10: Maya. Haddii uu qoysku ka kooban yahay wax ka badan tirada dadka ee la oggol yahay loogama baahna inay tirada qoyskooda yareeyaan hase ahaatee waxaa loo baahan yahay inayna kulan la yeelanin xubno kale oo ka socda qoys kale haddii marka ay isu yimaadaan tiradoodu ka badaneyso inta la oggol yahay.

S11: Waa maxay qeexitaanka qoys?

J11: Qoys waxaa loo tixgeliyaa dhammaan shaqsiyaadka ku wada nool isla hal guri gaar ah.

S12: Haddii ay dad gurigayga u joogaan ujeedooyin diimeed, sida barashada ama adeegyada bible-ka, miyey tahay inaan raaco xaddidaadaha qaarka ugu badan ee xarumaha diimaha?

J12: Maya. Isku-imaatinada ka dhacaya guryaha gaarka loo leeyahay waxa looga baahan yahay inay raacaan xaddidaadaha isku-imaatinada guriga iyo bulshada iyadoo lagu salaynayo heerka halista ee degmada uu isku-imaatinku ka qabsoomayo.

S14: Miyaa ururada dadka mabda' wadaagta ah loo tixgaliyaa xarumo diimeed oo markaas la oggol yahay inay raacaan xaddidaadaha qaadka ugu badan ee hay'adaha diimaha?

J14: Maya, ururrada isku danta ah looma tixgeliyo ururo diimeed. Isku-imaatinada ururadani waxa waajib ah inay raacaan xaddidaadaha isku-imaatinka bulshada iyadoo laga duulayo heerka halista ee degmada halka isku-imaatinka dadka mabda' wadaagta ah ka qabsoomayo. Waxaa intaas dheer, ururrada mabda' wadaagta ah waa inay u hoggaansamaan Hagista Waaxda ee Meheradaha Cuntada iyo Cabbitaanada haddii ay cunto iyo cabbitaan gadaan.

S15: Haddii aan ka kireysto goob fasax sida AirBnB ama VRBO, miyay xaddidaadaha isu-imaatinada guriga lagu dabaqi karaa?

J15: Haa, xaddidaada isku-imaatinka gurigu waxay khusaysaa heerka halista ee degmada halka guryaha kirada ee fasaxu ka dhacayaan. Kiraystayaasha waxa looga baahan yahay inay raacaan Hagista Waaxda ee Isku-imaatinada.

Helitaanka dukumiintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhooleyaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.